

Maamul - Goboleedka Massachusetts

Xafiiska Maamulka Sare ee Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha

Waaxda Adeegyada Koboceed

Codsiga U Qalmitaanka DDS

MACLUMAADKA CODSADAH

Da'da u dhexeysa uu ku jiro codsadaha:

☐ Wuxuu u dhexeeyaa da'da 5 sano iyo 22 sano jir

☐ 22 sano jir iyo ka wayn

Magaca Buuxa: _____ Taarikhda Dhalasho: ____/____/____
Saddexaad Koowaad Dhexe

Cinwaanka: _____
Lambarka Jidka Magaca Jidka Lambarka Guriga/Qaybta

Magaalada Wayn/Magaalada

Gobolka

Lambarka Goobta Boostada

Lambarka Badqabka Bulshadeed

Luuqadee ayuu codsadaha, ka masuulka ilmaha ama waalidka jecleysan lahaa inuu:

- Kaga hadla codsadaha? _____
- Ku helo qoraalada codsadaha khuseeya? _____
- Miyaa adeegyada turjubaanka loga baahan yahay maqalka? ☐ Haa ☐ Maya
XUSUUSO: Fasiraada iyo turjubaanka waa u bilaash codsadeyaasha

Habkee ugu fiican inaan kuula soo xiriirno? (Fadlan dooro dhammaan inta khuseysa)

- ☐ Aasaas Ahaan () _____ Farriin maan kuu dhaafi karnaa Haa ☐ Maya ☐
- ☐ Labaad () _____ Farriin maan kuu dhaafi karnaa Haa ☐ Maya ☐
- ☐ Iimayl _____

DUKUMEENTIGA LOO BAAHAN YAHAY

Dhammaan codsiyada loo soo gudbiyo DDS waxaa loga baahan yahay koobiyada dukumeentida xigta:

- Shahaadada Dhalasho
- Kaarka Badqabka Bulshada
- Kaarka(Kaararka) Caymiska Caafimaadka (MassHealth, Medicare, Caymis Shakhsiyeed)
- Caddaynta Deggenaanshaha MA– Tusaale Laysinka Dareewalka MA, Kaarka Aqoonsiga MA, Biilka kharashaadka guriga oo ku qoran Magaca/Cinwaanka
- Warbixino muujinaayo aqoonsi cudur ee qodobka aad dooneyso in laguugu qiimeeyo
- Foomka Qirashada Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga (oo ku jiro codsiga)

Haddii uu codsadaha ama aad adiga heshay mid ka mid ah adeegyada/qiimeynta hoose, fadlan soo bandhig dukumeentiga:

- Faro Gelinta Xiliga Hore/Sawirka Koboceed
- IEP (Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed) iyo Qiimeynta Khuseysa iyo ama Qorshaha Hawl Fududeynta 504
- Warbixinada Xirfadaha La Qabsiga
- Warbixin bandhigaayo aqoonsi cudur cad oo laxaad la'aanta garaad (ID) iyo ama xanuunada kooxda otismka (ASD)
- Warbixinta IQ ee lagu go'aamiyay qiimeynta cilmi nafsiga ama qiimeynta maskaxda iyo cilmi nafsiga
- Natijada baaritaanka hidde raaca ee laga baaraya Smith-Magenis, Prader-Willi ama cudurada kale oo hiddesidaha

MASUULNIMADA DARYEELKA

Qaybtan waa in la buuxiyo keli haddii uu jiro ka-masuulka ilmaha oo ay maxkamaddu magacaabtay

Haddii uu codsadhaha leeyahay qof daryeela oo maxkamaddu magacaabtay, waa waajib in dukumeentiga magacaabista masuulnimada lala gudbiyo codsigan. Haddii uu jiro daryeelaha maxkamaddu magacaabtay, codsigan waa waajib inuu saxiixo daryeelahaasi

Magaca Daryeelaha Sharciyeed _____ Xiriirka _____
Saddexaad Koowaad Uu la leeyahay codsadhaha

Cinwaanka Daryeelaha _____
Lambarka iyo Jidka Magaalada Wayn/Magaalada Goobta Boostada

Imayl _____ Telefoonka _____

XAALADDA IMINKA TAAGAN

Miyuu codsadhaha ama miyaad adiga tahay;

Qof guri kula nool qoyskiisa?	Haa ☐ Maya ☐ _____ Hadday jawaabtu maya tahay, halkee deggan tahay markii laga reebo dugsiga jiifka leh?
Qof ku nool dugsiga jiif leh?	Haa ☐ Maya ☐ _____ Hadday jawaabtu haa tahay, magaca iskuulka
Qof hoy la'aan ah?	Haa ☐ Maya ☐ _____ Hadday jawaabtu haa tahay, ilaa muddo intee dhan?
Qof la xiriiro wakaalad kale dawladeed?	Haa ☐ Maya ☐ _____ Hadday jawaabtu haa tahay, wakaaladee?
Qof hadda isbitaal ku jiro?	Haa ☐ Maya ☐ _____ Hadday jawaabtu haa tahay, magacaab isbitaalka
Qof ka diiwan geshan iskuul/jaamacad?	Haa ☐ Maya ☐ _____ Hadday jawaabtu haa tahay, magaca iskuulka/jaamacadda

NOOCA CODSIGA

Xaaladda Kobocood oo Si Dhaw Ula Xiriirto (Khuseyso ilmaha /dadka wayn da'da 5 – 22 sano jir)

Miyaad codsi ugu samaynaysaa DDS qodobka Xaaladda Kobocood oo Si Dhaw Ula Xiriirto awgiis? (115 CMR 6.06)

(1) Haa ☐ Maya ☐

XUSUUSO: Xaaladhaha Kobocood oo Si Dhaw Ula Xiriirto waxaa soo galaan cudurada hidde raaca.

Haddii aad codsiga ugu samaynayso inaad tahay qof qaba Xaaladda Kobocood oo Si Dhaw Ula Xiriirto waxaa waajib ah inaad soo gudbiso warbixin dhammaystiran ee ogaansho cudurka uu soo qoray xirfadle caafimaad oo rukhsad haysta sida Ph.D, Psy.D MD iwm. Aqoonsiga cudurka waa waajib in lagu aqoonsado dukumeentiga(da) ama natijada Baaritaanka Hidde Sidaha dhexdiisa.

Laxaad La'aanta Garaad

Miyaad codsi ugu samaynaysaa DDS qodobka Laxaad La'aanta Garaad (ID)?

Haa ☐ Maya ☐

Haddii aad codsiga ugu samaynayso inaad tahay qof qaba laxaad la'aanta garaad (ID), waxaa waajib ah inaad soo gudbiso, oo ay la socdaan codsigan, warbixin dhammaystiran ee ogaansho cudurka uu soo qoray xirfadle caafimaad oo rukhsad haysta sida Ph.D, Psy.D MD iwm. Dukumeentiga(dan) waa waajib inay aqoonsadaan aqoonsiga cudurkaaga. Tani waxaa soo gali baaritaanka IQ iyo garaadka.

Ciladaha Kooxda Otismka

Miyaad codsi ugu samaynaysaa DDS qodobka Ciladaha Kooxda Otismka (ASD)?

Haa ☐ Maya ☐

Haddii aad codsiga ugu samaynayso inaad tahay qof qaba ciladaha kooxda otismka (ASD) waxaa waajib ah inaad soo gudbiso, oo ay la socdaan codsigan, warbixin dhammaystiran ee ogaansho cudurka uu soo qoray xirfadle caafimaad oo rukhsad haysta sida Ph.D, Psy.D MD iwm.

Cudurka Prader-Willi

Miyaad codsi ugu samaynaysaa DDS qodobka ogaansho cudurka Prader-Willi?

Haa ☐ Maya ☐

Haddii aad codsiga ugu samaynayso inaad tahay qof qaba Prader-Willi waxaa waajib ah inaad soo gudbiso, oo ay la socdaan codsigan, baaritaanka hidde sidaha ee xaqiijinaayo ogaansho cudurka Prader – Willi.

Cudurka Smith Magenis

Miyaad codsi ugu samaynaysaa DDS qodobka ogaansho cudurka Smith Magenis?

Haa ☐ Maya ☐

Haddii aad codsiga ugu samaynayso inaad tahay qof qaba Smith Magenis Cudurka waxaa waajib ah inaad soo gudbiso, oo ay la socdaan codsigan, baaritaanka hidde sidaha ee xaqiijinaayo ogaansho cudurka Smith Magenis.

Inta ka dhiman bogga ayaa iyada oo maran loga tagay

WAALIDKA AMA QOFKA TOOSKA LOLA XIRIIRA

Magaca Buuxa: _____ Xiriirka: _____
Saddexaad Koowaad Dhexe Uu la leeyahay codsadaha

Lambarka Jidka Magaca Jidka Lambarka Guriga/Qaybta Magaalada Gobolka Goobta Boostada

Habkee ugu fican inaan ugula soo xiriirno? (Fadlan dooro dhammaan inta khuseysa)

☐ Aasaas Ahaan () _____ Farriin maan kuu dhaafi karnaa Haa ☐ Maya ☐

☐ Labaad () _____ Farriin maan kuu dhaafi karnaa Haa ☐ Maya ☐

☐ Iimayl _____

DADKA LALA XIRIIRO AAD IDAMTAY

Hadii uu jiro qof aad jecleysan lahayd inaad u idamto in lagalasoo xiriiro ujeedooyinka u qalmitaanka, fadlan hoosta ku tilmaan. Qofka wuxuu noqon karaa shaqaale bulshadeed, macalin, xirfadle daawayn iwm. Qofkan ma noqon karo daryeelaha sharciyeed.

Magaca Buuxa: _____ Xiriirka: _____
Saddexaad Koowaad MI Uu la leeyahay codsadaha

Lambarka Jidka Magaca Jidka Lambarka Guriga/Qaybta Magaalada State Goobta Boostada

Habkee ugu fican inaan ugula soo xiriirno? (Fadlan dooro dhammaan inta khuseysa)

☐ Aasaas Ahaan () _____ Farriin maan kuu dhaafi karnaa Haa ☐ Maya ☐

☐ Labaad () _____ Farriin maan kuu dhaafi karnaa Haa ☐ Maya ☐

☐ Iimayl _____

Waxaan DDS u idmayaa inay kala hadlaan wixii khuseeya codsigayga iyo diiwanadayda shakhsiga kor ku magacaaban iyadoo lola jeedo in lagu dhammaystiro geedi socodka go'aaminta u qalmitaanka.

Saxiixa Codsadaha/Daryeelaha Sharciyeed

Taariikhda

Maamul-Goboleedka Massachusetts
Waaxda Adeegyada Koboceed
FOOMKA IDMANTA SHAACINTA MACLUMAADKA

QAYBTA I. Maclumaadka Shakhsiyeed:

Magaca Shakhsiga: _____

Magaca(yada) Kale: _____

Cinwaanka: _____

Telefoonka: _____

Badqabka Bulshadeed: _____

Taariikhda Dhalasho: _____

- ☐ Waxaan u idmayaa Waaxda Adeegyada Koboceed inay u shaaciyaan adeeg bixiyaha, wakaaladda, shirkadda, ama shakhsiga lagu magacaabay Qaybta II ee hoose, maclumaadka xiga:
- ☐ Waxaan u idmayaa adeeg bixiyaha, wakaaladda, shirkadda, ama shakhsiga lagu magacaabay Qaybta II ee hoose inay u shaaciyaan maclumaadka xiga Waaxda Adeegyada Koboceed:
- | | | |
|--|---|--|
| ☐ Baaritaanka Cilmi Nafsi | ☐ Diiwaanka Buuxa | ☐ Qorshaha Adeeg Kale |
| ☐ Taariikhda Caafimaadeed | ☐ Taariikhda Daawada | ☐ Dukumeentida Masuulnimada Daryeelka |
| ☐ Taariikhda Waxbarashadeed | ☐ ITP/ISP | ☐ Warbixinada Isbitaalka |
| ☐ Kale (Caddee) _____ | | |

QAYBTA II. Cidda Idman ee Helaysa Maclumaadka. Waxaan u idmayaa adeeg bixiyaha, wakaaladda, shirkadda, ama shakhsiga lagu liis gareeyey hoosta inuu shaaciyo/helo maclumaadka ku liis garaysan Qaybta I uu la wadaago/uga timid Waaxda Adeegyada Koboceed:

Magaca

Shirkadda

Cinwaanka

QAYBTA III. U Jeedada Shaacinta. Fadlan sheeg ula jeedada isticmaalka ama shaacinta maclumaadka (tusaale daawaynta caafimaad, ula jeedo sharci, caymis, shakhsiyeed, iwm. – caddee. Haddii aad dooneynin inaad liis gareysa sabab, waxaad si fudud u qori kartaa: “iyadoo la raacayo codsigayga,” waa haddii uu codsiga adiga kaa socdo)

Isticmaal kale oo ka duwan ama shaacin kale oo maclumaadkan ayaa lagu mamnuucay qaanuunada Massachusetts iyo xeerarka iyo siyaasadaha Waaxeed.

QAYBTA IV. Shaacinta(nada) Dheeraadka ah. Waaxda Adeegyada Koboceed ama adeeg bixiyaha, wakaaladda, shirkadda, ama shakhsiga lagu liis gareeyey Qaybta II ayaa la wadaagi karaa maclumaadkayga shakhsigan(yadan) ama shirkadda:

Magaca

Shirkadda

Cinwaanka

QAYBTA V. Caddaynta. Waxaa la iga wargaliyay faa'idada iyo khasaarada ka dhalan karta shaacinta maclumaadka sare waxaana si xor ah u ansixinayaa shaacinta. Waxaan fahansan yahay in aan xaq u leeyahay inaan buriyo idamka xili walba. Haddii aan buriyo idamkan, waa waajib in hab qoraal aan ugu buriyo ka dib na usoo gudbiyo shakhsiga/xaruunta/wakaaladda loo idmay inay shaaciso maclumaadka. Waxaan fahansan yahay in burinta loo isticmaali doonin maclumaad horey loo shaaciyay iyada oo la raacay oggolaanshahan.

Idamkan wuxuu soo afjarmi doonaa _____ (taarikhda ama dhacdada – waa waajib inay dhaafin hal sano). Waxaan fahansan yahay in goorta maclumaadka sare la shaaciyay, qofka helaayo ayaa isagana mar labaad shaacin karaa taas oo maclumaadkaa ka saaraysa ilaalada sharciyada iyo xeerarka qarsoodiga ee dawladda federaalka ama gobolka. Waxaan fahansan yahay in idmanta isticmaalka ama shaacinta maclumaadka kor lagu aqoonsaday ay tahay xor. Waxaan fahansan yahay in aan ugu baahnayn inaan saxiixo foomkan si aan ugasii helo adeegyada caafimaadka DDS.

Saxiixa Shakhsiga Maclumaadka Leh ama Qofka Ka Masuulka ah

Taarikhda

Qor Magaca (iyo aqoonso awoodda sharciyeed haddii uu saxiixay Ka Masuulka ama Wakiil Kale oo Sharciyeed/La Idmay)

QAYBTA VI. Idmanta Gaarka ah. Waxaan si gaar ah ugu idmaya in la shaaciyay maclumaadka xiga (Fadlan dooro dhammaan inta khuseysa):

- ☐ Ilaa xadka diiwaankayga caafimaad ay ku jiraan maclumaad la xiriiro baaritaanka HIV ee antiboodiga iyo antijiinka oo ku ilaashan qaanuunka M.G.L. c.111 S.70F, ogaansho cudur oo HIV/AIDS ama daawaynta HIV/AIDS, waxaan si gaar ah ugu idmayaa u shaacinta ama la wadaaga maclumaad noocaasi ah.
- ☐ Ilaa xadka diiwaankayga caafimaad ay ku jiraan maclumaad la xiriiro daawaynta khamriga ama maandooriyaha oo ku ilaashan Xeerka Dawladda Federaalka, 42 CFR, Qaybta 2aad, waxaan si gaar ah ugu idmayaa shaacinta ama la wadaaga maclumaad noocaasi ah.

Saxiixa Shakhsiga Maclumaadka Leh ama Qofka Ka Masuulka ah

Taarikhda

TILMAANTA:

1. Foomkan waxaa waajib ah in si dhammaystiran loo buuxiyo (markii laga reebo Shaacinta Gaarka Loo Idmay) si loo aqbal.
2. Hubi in taarikhda soo afjarmayso ama dhacdada lagu liis gareeyey bogga 2aad ay tahay mid macquul ah.
3. **Faafinta koobiyada: Asalka oo la siiyo adeeg bixiyaha; koobiga la siiyo shakhsiga ama wakiilka shakhsi; iyadoo la ogaysiinaayo shakhsiga/xaruunta/wakaaladda codsiga samaynayso.**

IDMANTA GO'AAMINTA U QALMITAANKA DDS

Waxaan codsanayaa in Waaxda Adeegyada Koboceed (DDS) ay qabato qiimeynta go'aaminta u qalmitaanka adeegyada. Oggolaanshahan waa mid ansax ah ilaa codsigayga si buuxda loga qiimeeyo ama ilamaa aan hab qoraal ku ogeysiyo DDS inaan buriyay.

Saxiixa idmanta go'aaminta u qalmitaanka: _____

Magaca Codsadaha

☐ Codsadaha ☐ Daryeelaha Sharciyeed

Saxiixa Codsadaha/Daryeelaha Sharciyeed

Taarikhda

Qor Magaca Codsadaha/Daryeelaha Sharciyeed

Cinwaanka Buuxa ee daryeelaha sharciyeed

#Aasaasiga

#Labaad

TILMAANTA UGU DAMBAYSA EE U GUDBINTA CODSIGA DDS

- Hubi in dhammaan maclumaadka codsigan la buuxiyay
- Hubi in dhammaan saxiixyada loo baahan yahay la buuxiyay
- Ku lifaaq dhammaan dukumeentida lasoo codsaday codsigan
- Boggaga xiga ka aqri OGEYSIINTA HABRAACYADA QARSOODIGA (4 bog)
 - U kaydso afarta bog ee Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga diiwaanadaada shakhsi
 - Saxiix ka dib na lasoo celi Foomka Qirashada Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga codsiga

Usoo gudbi waqadahan dhammaystiran Xafiiskaada deegaan ee Goboleed ee DDS adigoo ku jiheynaya Guddiga U Qalmitaanka Gobolka ee hoosta lagu aqoonsaday. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ka hor intii aad dirin codsigaaga iyo lifaaqyada loga baahan yahay, fadlan lasoo xiriir Guddigaada U Qalmitaanka Gobolka deegaaneed.

DDS Central/West Region

One Federal Street
Bldg. 111-2
Springfield, MA 01105
Lambarka Qaashada: **(413)-205-0940**
Fakis: (413) 205-1603

DDS Metro Region

465 Waverley Oaks Road Suite 120
Waltham, MA 02452
Lambarka Qaashada: **(781) 314-7513**
Fakis **781-314-7539**

DDS Southeast Region

151 Campanelli Drive Suite B
Middleboro, MA 02346
Lambarka Qaashada: **(508)-866-8800**
Lambarka Fakis: (508) 866-8859

DDS Northeast Region

Xaruunta Goboleed ee Hogan
PO Box A Hathorne, MA 01937
Lambarka Qaashada: **(978) 774-5000 x850**
FAKIS 978-739-0420

Maamul - Goboleedka Massachusetts

Xafiiska Maamulka Sare ee Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha
Waaxda Adeegyada Koboceed

Foomka Qirashada Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga

Magaca Codsadaha: _____

Xaruunta/Gobolka/Deegaanka/Barnaamijka: _____

Waxaan dib u eegay koobiga Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga ee DDS

➡ Saxiixa: _____ Taarikhda _____
Shakhsiga ama Wakiilka Shakhsi oo leh awoodda sharciyeed ee lagu fuliyo go'aamaha caafimaad

Haddii uu saxiixay Wakiilka Shakhsi:

Qor Magaca: _____

Xilka: _____ (waalidka/ masuulka iwm.)

Marqaatiga: _____ Taarikhda: _____

Foomkan waxaa waajib ah in la kaydiyo ilaa muddo gaaraysa ugu yeraan lix sano oo lagu kaydiyo diiwaanada habboon iyada oo la raacaya buug yaraha Qarsoodiga DDS

Maamul - Goboleedka Massachusetts
Xafiiska Maamulka Sare ee Caafimaadka & Adeegyada
Aadanaha Waaxda Adeegyada Koboceed

U KAYDI DUKUMEENTIGAN DIIWAANADAADA SHAKHSIYEED

OGEYSIINTA HABRAACYADA QARSOODIGA

OGEYSIINTAN WAXAY TILMAAMAYSAA SIDA MACLUMAADKA CAAFIMAAD EE ILAASHAN OO ADIGA KU KHUSEEYO LOO ISTICMAALI KARO IYO LOO SHAACIN KARO IYO SIDA AAD U HELI KARTO MACLUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH U QHIMEE.

Ujeedada:

Ogeysiintan waxaa logu talagalay in lagaa wargeliyo habraacyada iyo waajibaadka sharci ee Waaxda Adeegyada Koboceed ee khuseeyo ilaalinta qarsoodiga diiwaanadaada caafimaad ama daawayneed oo aan abaabulno ama helno. Ogeysiintan waxay sidoo kale sharaxaysaa xuquuqdaada khuseeyo maclumaadkaaga caafimaad iyo waajibaadka Waaxda. Sida hoosta logu sharaxay, waxaa sharciyan nogala baahan yahay inaan xaqiijino in maclumaadka caafimaad ama daawayneed ee laguugu aqoonsan karo la ilaaliyo.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ka qabto nuxurka Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga, haddii aad u baahato inaad kala xiriirto qof ku sugan Waaxda mid ka mid ah maclumaadka ku jiro Ogeysiintan Habraacyada Qarsoodiga, ama aad cabasho ka qabtid Habraacyada Qarsoodiga Waaxda, waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Qarsoodiga ee Waaxda:

Privacy Officer
Department of Developmental Services
1000 Washington Street
Boston, MA 02118
(888) 367-4435, x7717

I. Waa Maxay Maclumaadka Caafimaad ee Ilaashan?

Maclumaadka Caafimaad ee Ilaashan (PHI) waa maclumaadka ay Waaxda ka uruuriso caafimaadkaaga ama cudurka waqti lasoo dhaafay, xiliga la joogo, ee khuseeyo adeeg bixinta caafimaad oo lagu siiyo, ama lacag bixinta adeega caafimaad. Iyada oo lagu salaynaayo siyaasadaha qarsoodiga ama sharciga khuseeya, Waaxda ayaa ilaa muddo dheer u heelan inay ilaaliso qarsoodigaada iyo qarsoodiga maclumaadka caafimaadka ilaashan aanu kaa hayna. Xagga sharciga dawladda federaalka, waxaa nogala baahan yahay inaan ku siino ogeysiintan ee khuseysa habraacyada qarsoodiga ee sharaxaysa habka, goorta, iyo sababta aan u isticmaali karna ama u shaacin karno PHI-gaada.

Waxaad ka codsan kartaa koobiga ogeysiinta Xafiis walba ee Waaxda Adeegyada Koboceed. Waxaa sidoo kale lagu daabacaa boggeena halkan www.dds.state.ma.us.

II. Sidee Waaxda U Isticmaali Kartaa iyo U Shaacin Kartaa PHI-gaada?

Si adeegyada laguugu fidiyo, DDS ayaa ku qasban inay u isticmaasho iyo u shaaciso Maclumaadka Caafimaad ee Ilaashan siyaabo kala duwan. Hoosta waxaa xiga tusaalooyinka noocyada isticmaalka iyo shaacinta PHI ee la aqbalo *iyada oo lagaaga baahan idam*.

Sida guud, Waaxda ayaa u isticmaali kartaa ama u shaacin kartaa xogtaada PHI sida xigta:

- **Xagga Daawaynta:** DDS ayaa u isticmaali kartaa xogta PHI ee ku khuseysa si laguugu fidiyo daawaynta ama adeegyada. Tusaale ahaan, xubnaha guddigaada daawaynta waxaa dhici kartaa inay ka wada hadlaan xogtaada PHI si loo abaabulo iyo loo hirgeliyo qorshaha adeegyadaada. DDS ayaa sidoo kale u shaacin kartaa xogta PHI ee ku khuseysa dadka ama adeeg bixiyeyaasha ka baxsan Waaxda oo ku lug yeelan karo daawayntaada, laakin inta ugu yar ee xogta ayaa la isticmaali doonaa ama loo shaacin doonaa ujeedadan.
- **Si Loo Helo Lacagta:** DDS ayaa u isticmaali kartaa ama shaacin kartaa xogtaada PHI si loo qarasheeyo iyo loga qaato lacagaha ku baxay adeegyadaada caafimaad. Tusaale ahaan, DDS ayaa u shaacin kartaa qaybo ka mid ah xogtaada PHI Barnaamijka Medicaid, Xafiiska Badqabka Bulshadeed, shaqaalaha Waaxda, ama caymis shakhsi.
- **Xagga Hawlaha Adeegyada Caafimaad:** DDS ayaa u isticmaali kartaa ama shaacin kartaa xogtaada PHI xagga ujeedada ka shaqaynta xaruumaha, xafiisyada, xaruumaha kobocood ee Waaxda iyo dhammaan barnaamijya iyo dhammaan barnaamijya Waaxda. Isticmaalada iyo shaacinta noocan ayaa lagama maarmaan u ah ka shaqaynta barnaamijyadeena iyadoo ku jirto xaqiijinta in dhammaan macaamiisheena helaan adeeg tayo leh. Tusaale ahaan, waxaan u isticmaali karnaa xogtaada PHI wanaajinta tayada si loo qiimeeyo daawaynta iyo adeegyada iyo in loo qiimeeyo waxqabadka Waaxda iyo/ama shaqaalaha isbitaalka ee ku daryeelaya. Waxaan sidoo kale u shaacin karnaa maclumaadkaada dhaqaatirta, kalkaaliyada, farsamo yaqaanka, ardayda caafimaad iyo shaqaalaha kale oo ku liis garaysan halka sare oo ula jeedada qiimeynta iyo barashada. Waxaa sidoo kale lagama maarmaan noqon kartaa in laga helo ama lala wadaago maclumaadkaaga wakaaladaha kale dawladeed ee Massachusetts.

Sharciga wuxuu dhigaa inaan isticmaali karna ama shaacin karna xogtaada PHI *adiga oo lagaa helin idam ama oggolansho* marxaladahan xiga gudahooda:

- **Goorta Sharciyan Loga Baahda iyo Loga Baahda Hawlo Dawlad ee Gaar ah:** DDS ayaa shaacin kartaa PHI goorta sharci dawladeed uga baahdo inay ka warbixiyaan arrin loga shakiyo tacadi, dayac ama rabshad qoyseed, ama la xiriirto hawl dembi oo laga shaki qaba, ama iyada oo laga falcelinaaya ammar maxkamadeed law. Waxaan sidoo kale u shaacin karnaa PHI wakaaladaha dawladeed ee ka kormeero u hoggaansanaanta shuruudahan qarsoodiga. Waxaan sidoo kale u shaacin karnaa PHI barnaamijyada faa'idada dawladeed ee khuseeya u qalmitaanka iyo diiwan gelinta, sida Medicaid, xagga sheegashada magdhawga shaqaalaha, iyo sababaha amniga qaran, sida ilaalinta Madaxwaynaha.
- **Xagga Hawlaha Caafimaadka iyo Nabadgeliyada Dadwaynaha:** DDS ayaa shaacin kartaa PHI goorta noogala baahda inaan xog ka uruurino cudur ama dhaawac, ama inaan uga warbixino tirakob ay leedahay wakaalad caafimaadka dadweyne, ka warbixinta falcelinta daran ee daawada, dib u celinta badeecada, ama ka hortagga cudur.
- **Xagga Hawlaha Kormeerka Caafimaadka:** DDS ayaa u shaacin kartaa PHI Waaxda dhexdeeda ama la wadaagi kartaa wakaaladaha kale dawladeed ee waajibbaad ka saaran kormeerka nidaamka caafimaad oo ula jeedada ka leh ka warbixinta ama baaritaanka dhacdooyinka caadiga ahayn, iyo ka kormeerka Barnaamijka Medicaid.
- **La Xiriirta Dadka Dhintay:** DDS ayaa u shaacin kartaa PHI ee la xiriira dhimashada, saraakiisha baaritaanka maydka, dhaqaatirta baaritaanka, ama agaasimeyaasha aasidda, iyo hay'adaha uruurinta xubnaha, xogta la xiriirta tabaruca xubnaha, isha, ama unugyada ama tallaalka xubnaha. Maclumaadka ayaa sidoo kale loo shaacin karaa iyada oo khuseysa baaritaanada gudaha ama dibadda.
- **Xagga Ujeedooyinka Cilmi Baarista, Xisaab Hubinta, ama Qiimeynta:** Marxalado qaarkooda, iyo iyadoo hoos tagaysa kormeerka guddiga qiimeynta cilmi baarista, DDS ayaa u shaacin kartaa PHI cilmi baareyaal iyo dadka ay wakiisheen si loo caawiyo cilmi baarista.
- **Si Loga Falceliyo Dacwooyinka iyo Tallaabada Sharci:** DDS ayaa shaacin kartaa maclumaadka caafimaad ee kugu saabsan iyada oo ka falcelinaysa ammar maxkamadeed ama dawladeed, ama iyada oo ka falcelinaysa ammarka xog bixinta ilaa xadka uu idmay sharciga dawladda gobolka ama federaalka, iyada oo ku jirto laakin aan ku koobnayn G.L. c. 123B, § 17 (Qarsoodiga Diwaanada DDS); G.L. c. 66A, § 2 (Qaanuunka Habraacyada Maclumaadka Cadaaladda ah); G.L. c. 111, § 70(f) (baaritaanka HIV); G.L. c. 111B, § 11 (daawaynta khamriga); iyo G.L. c. 111E, § 18 (daawaynta maandooriyaha).
- **Ka Hortagga Halista Caafimaadka ama Nabadgeliyada:** Si loga hortago halista wayn oo ku aadan caafimaadka ama nabadgeliyada, DDS ayaa u shaacin kartaa PHI sida logu baahan yahay hay'adaha sharci fulinta ama shakhsiyada kale oo si macquul ah oga hortagi karo ama u dhimi karo halista waxyeelaha.

III. Isticmaalada iyo Shaacinta PHI ee u Baahan Idamkaada.

Xagga isticmaalada iyo shaacinta oo ka baxsan ujeedada daawaynta, lacag bixinta iyo hawlaha adeegyada caafimaad, waxaa nogala baahan yahay inaan haysano idamkaada qoraaleed, ilamaa goorta isticmaalka ama shaacinta ay hoos tagta marxaladaha laga reebay ee lagu tilmaamay qaybta sare. Oggolaanshaha ayaa la burin karaa goor walba si loo joojiyo

isticmaalka/shaacinta mustaqbalka markii laga reebo ilaa xadka oo ah haddii aan tallaabo hore u qaadnay anaga oo isu halaynay idmanta hore aad bixisay.

IV. Isticmaalka iyo Shaacinta Xadidan ee loo sameeyo Qoysaska, Asxaabta, iyo Dadka Kale Waa Haddii Aad Ka Hor Iman

Waxaan u shaacin karnaa tiro kooban ee xogtaada PHI qoysaska, asxaabta, ama dadka kale ee la xiriir daryeelkaaga haddii aan intii shaacinta aan samaynin aan kaa wargelino oo adigana aad diidin, iyo haddii uu sharciga si kale u mamnuucin shaacintaasi.

V. Dooqada ku Saabsan Habka ay DDS U Shaaciso Maclumaadkade Caafimaad ee Ilaashan

Xagga maclumaadka caafimaad qaar waxaad ka wargelin kartaa DDS dooqada ku saabsan dadka/waxaan la wadaagi karno. Marxaladahan dhexdooda, waxaad leedahay xaq iyo dooqa ka wargelinta DDS in:

- Inay la wadaagto maclumaadka qoyskaada, asxaabtaada dhaw, ama dadka kale ee ku lug leh daryeelkaaga;
- Inay la wadaagto maclumaadka xaaladda caawinta musiibada;
- Inay ku darto maclumaadkaaga diiwaanka isbitaal/xaruunta;
- Inay kaala soo xiriirto hawlaha lacag uruurinta.

Haddii aad awoodi karin inaad noo sheegto dooqyadaada, tusaale ahaan haddii aad miyir daboolan tahay, DDS ayaa shaacin kartaa maclumaadkaaga haddii aan aaminsan nahay inay dantaada ku jirto. Waxaan sidoo kale shaacin karnaa maclumaadkaaga goorta ay lagama maarmaan u tahay in lagu dhimo halis wayn oo taagan ee caafimaadka ama nabadgeliyada.

VI. Shaacinta La Mamnuucay

Waxda marnaba uma isticmaali doonto ama uma shaacin karto xogtaada maclumaadka caafimaad ee ilaashan ujeedada suuqgelin, iibinta maclumaadkaaga, ama wadaaga qoraalka cilmi nafsigaada markii laga reebo goorta aad bixisay oggolaanshahaada qoraaleed. Xagga marxaladda lacag uruurinta, DDS ayaa kuula soo xiriiri kartaa hawsha lacag uruurin – laakin waxaad kula talin kartaa DDS inay dib kuula soo xiriirin.

VII. Xuquuqdaada Khuseysa Maclumaadkaaga Caafimaad ee Ilaashan

Waxaad leedahay xuquuqda xigta ee khuseysa Maclumaadkaaga Caafimaad ee Ilaashan:

- **Inaad Hesho Koobiga Ogeysiintan Habraacyada Qarsoodiga:** DDS ayaad ka codsan kartaa koobi warqadeed ee ogeysiintan goor walba.
- **Inaad Baarto iyo Codsato Koobiga Xogtaada PHI:** Ilaamaa helitaankaaga diiwaanadaada loo xadiday sababo daawayneed cad oo caddaymo leh, waxaad xaq u leedahay in aad baarto iyo koobi ka hesho Maclumaadka Caafimaad ee Ilaashan ee warqadeed iyo elektrooniga markaad hab qoraal ku codsato. Codsiga waa in loo sameeyo Sarkaalka Qarsoodiga iyada oo loo marayo isu duwahaaga adeega ama Xafiiska Deegaaneed. DDS ayaa kaaga soo jawaabi doonto codsigaaga 30 maalmood gudahooda. Haddii aad dooneyso koobiyada xogtaada PHI, waxaa macquul ah in kharash lagu saaro.
- **Inaad Doorato Inuu Qof Go'aamaha Kuu Fuliyo:** Haddii aad qof siisay awoodda wakiilnimada caafimaad ama uu qof yahay daryeelahaaga sharciyeed, qofkaasi ayaa isticmaali karaa xuquuqdaada iyo go'aamo ka samayn kari doonaa maclumaadkaaga caafimaad ilaa xadka sharciga idmay. DDS ayaa ixtiraami doontaa codsiyada/dooqyada qofka wakiilka sharciyeed oo idman ilaa xadka sharciga idmay.
- **Inaad Codsato Xadidka Isticmaalka/Shaacinta:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in DDS ay xadida sidaan u isticmaali karta ama u shaacin karta xogtaada PHI ama aad ka codsato in DDS isticmaalin ama shaacin qaar ka mid ah maclumaadka caafimaad xagga ula jeedada daawaynta, lacag bixinta, ama hawlaha caafimaad. Waxda ayaa tixgelin doontaa codsigaada, laakin sharciyan kuma qasbano inay aqbasho xadidka haddii ay saamayn ku yeelan karto daryeelkaada ama adeeg bixinta. Haddii aad si buuxda jeebkaaga uga bixiso adeeg ama hawl caafimaad, waxaad ka codsan kartaa in DDS ay u shaacin xogtaasi ujeedada lacag bixinta ama hawlaheena aan la leenahay caymiskaaga caafimaad.

- **Inaad Doorato Habka Aan Kula Soo Xiriiri Karna:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in DDS kugusoo dirto maclumaadka cinwaan beddelaan ama hab beddel ah; ay ku jirto codsiga(yada) inaan kuula soo xiriirno siyaabo qarsoodi ah.
- **Inaad Codsato Wax Ka Beddelka Xogtaada PHI:** Haddii aad aaminsan tahay inuu jiro khalad ama maclumaad ka maqan tahay diiwaankeena xogtaada PHI, waxaad ku codsan kartaa, hab qoraaleed, inay DDS saxdo ama wax ku kordhiso diiwaanka. DDS ayaa kasoo jawaabi doonto 60 maalmood gudahooda ka dib markay hesho codsigaada. Haddii ay diido waxay sheegi doontaa sababta diidmada iyo sharixi doontaa xuquuqdaada codsiga iyo diidmada, iyadoo la socoto qoraal loga jawaabay qoraalkaada, oo ku lifaaqan xogtaada PHI.
- **Inaad Codsato Hubinta Shaacinta Hore Loo Sameeyey:** Marxalado qaarkooda, waxaad xaq u leedahay inaad hesho liiska goorta, cidda, iyo ula jeedada, iyo nuxurka xogtaada PHI la shaaciyay.
- **Inaad Gudbiso Dacwo:** Haddii aad u malayso in DDS ku xadgudubtay xuquuqdaada qarsoodiga, ama aad diido go'aan ay Waaxda ka gaartay helitaankaada xogtaada PHI, cabasho ayaad u gudbin kartaa Sarkaalka Qarsoodiga DDS. Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykan adiga oo warqad usoo diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, soo wacaya 1-877-696-6775, ama soo booqanaya bogga HHS's halkan: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/. Waaxda tallaabo aargoosi kaama qaadi doonto haddii aad cabasho noocaasi samayso.

VIII. Waajibaadka Qarsoodiga iyo Amniga ee DDS

Waaxda waxay leedahay waajibaadka xiga ee khuseeya maclumaadkaaga caafimaad ee ilaashan:

- **Ilaalinta Qarsoodiga Maclumaadkaaga Caafimaad:** DDS ayaa sharciyan loga baahan yahay inay ilaaliso qarsoodiga iyo amniga maclumaadkaaga caafimaad ee ilaashan.
- **Ku Ogeysiinta Xadgudubka:** DDS ayaa si degdeg ah kula soo xiriiri doonto haddii xadgudub amni dhacay oo surogal tahay in amniga qarsoodiga maclumaadka caafimaad halis galay.
- **Ogeysiinta Habraacyada Qarsoodiga:** DDS ayaa ku qasban inay u hoggaansanaato waajibaadka iyo habraacyada qarsoodiga lagu tilmaamay ogeysiintan iyo inay koobiyada adigana kula wadaagto.
- **Isticmaalka iyo Shaacinta Idman:** DDS uma isticmaali doonto ama uma shaacin karto maclumaadkaaga hab ka baxsan sida lagu tilmaamay ogeysiintan markii laga reebo sida aad qoraal ahaan ugu idamtay. Go'aankaaga ayaa sidoo kale beddeli kartaa adigoo burinaayo idamkaada goor walbo adigoo hab qoraal kula xiriiraysa Waaxda.

Si aad u hesho maclumaad dheeraad ah eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.

Codsiga iyo Taarikhda Dhaqan Gelinta:

Ogeysiintan waxaa loo isticmaali doona isticmaalka ama shaacinta Maclumaadka Caafimaad ee Ilaashan ee dhammaan Xaruumaha, Xafiisyada, Xaruumaha Koboceed ama Goboleed ee Waaxda, iyo dhammaan barnaamijya Waaxda; ay ku jirto isticmaalka ama shaacinta PHI ay samaynayaan shakhsiyada ama shirkadaha kula jiro Waaxda nidaam caafimaad habaysan (OHCA). Shakhsiga ama shirkadaha xiriir noocaasi kula jira DDS ee OHCA ayaa u hoggaansami doonaan waajibaadka DDS iyo habraacyada qarsoodiga lagu tilmaamay ogeysiintan.

Ogeysiintan waxay dhaqan geli ka bilaabato Abriil 14ka, 2003 (sida dib logu saxay Seteembar 1da, 2014). Waaxda waxaa u ilaashan xuquuqda inay goor walba wax ka beddesha habraacyada qarsoodiga iyo shuruudda ogeysiintan. Ogeysiinta cusub ayaa lagu heli doonaa codsi, ama Xafiis Walba oo DDS, iyo bogga Waaxda.

MAAMUL-GOBOLEEDKA MASSACHUSETTS
WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED
Qaadashada Goboleed iyo U Qalmitaanka
Magaalooyinka Gobol/Magaalooyinka

DDS Central/West Region Regional
Isu Duwaha U Qalmitaanka Goboleed
One Federal Street
Bldg. 111-2
Springfield, MA 01105
Lambarka Qaadashada: (413)-205-0940
Fakis: (413) 205-1603

Magaalooyinka Wayn iyo Yar ee Gobolka DHEXE/GALBEED:

Adams, Agawam, Alford, Amherst, Ashburnham, Ashby, Ashfield, Ashley Falls, Athol, Auburn, Ayer, Baldwinville, Barre, Becket, Belchertown, Bellingham, Berlin, Bernardston, Blackstone, Blandford, Bolton, Boylston, Brimfield, Brookfield, Buckland, Charlemont, Charlton, Cherry Valley, Cheshire, Chester, Chesterfield, Chicopee, Clarksburg, Clinton, Colrain, Conway, Cummington, Dalton, Deerfield, Douglas, Dudley, East Brookfield, Easthampton, East Longmeadow, Egremont, Erving, Feeding Hills, Fitchburg, Florida, Franklin, Gardner, Gill, Goshen, Grafton, Granby, Granville, Groton, Great Barrington, Greenfield, Hadley, Hancock, Hampden, Hardwick, Harvard, Hatfield, Hawley, Heath, Hinsdale, Holden, Holland, Holyoke, Hopedale, Housatonic, Hubbardston, Huntington, Indian Orchard, Lancaster, Lanesboro, Lee, Leeds, Leicester, Lenox, Leominster, Leverett, Leyden, Longmeadow, Ludlow, Lunenburg, Medway, Mendon, Middlefield, Millers Falls, Milford, Millbury, Millville, Monroe, Monson, Montague, Monterey, Montgomery, Mt. Washington, New Ashford, New Braintree, New Marlboro, New Salem, North Adams, Northampton, Northbridge, Northfield, North Brookfield, Oakham, Orange, Otis, Oxford, Palmer, Paxton, Pelham, Pepperell, Petersham, Peru, Phillipston, Pittsfield, Plainfield, Princeton, Richmond, Rowe, Royalston, Russell, Rutland, Sandisfield, Savoy, Sheffield, Shelburne, Shirley, Shrewsbury, Shutesbury, Southbridge, South Deerfield, South Hadley, Leominster, Southampton, Southwick, Spencer, Springfield, Sterling, Sturbridge, Stockbridge, Sunderland, Sutton, Templeton, Tolland, Townsend, Turners Falls, Tyringham, Upton, Uxbridge, Wales Ware, Warren, Warwick, Washington, Webster, Wendell, West Boylston, West Brookfield, Westfield, Westhampton, Westminster, West Springfield, West Stockbridge, Whately, Whitinsville, Wilbraham, Williamsburg, Williamstown, Winchendon, Windsor, Worthington, Worcester

MAAMUL-GOBOLEEDKA MASSACHUSETTS

WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED

Qaadashada Goboleed iyo U Qalmitaanka

Magaalooyinka Gobol/Magaalooyinka

DDS Metro Region

Isu Duwaha U Qalmitaanka Goboleed

465 Waverley Oaks Road Suite 120

Waltham, MA 02452

Lambarka Qaadashada: (781) 314-7513

Lambarka Fakis: (781) 314-7539

Magaalooyinka Wayn iyo Yar ee Gobolka Metro:

Allston, Ashland, Beacon Hill, Belmont, Boston, Brighton, Brookline, Cambridge, Canton, Charlestown, Chelsea, Chestnut Hill, Chinatown, Dedham, Dorchester, Dover, Downtown Crossing, East Boston, Foxboro, Framingham, Holliston, Hopkinton, Hudson, Hyde Park, Jamaica Plain, Marlboro, Mattapan, Medfield, Millis, Natick, Needham, Newton, Norfolk, Northborough, North Dorchester, North End, Norwood, Plainville, Revere, Roslindale, Roxbury, Sharon, Sherborn, Somerville, Southborough, South Boston, South End, Sudbury, Walpole, Waltham, Watertown, Wayland, West Roxbury, Wellesley, Westborough, Weston, Westwood, Winthrop, Wrentham

MAAMUL-GOBOLEEDKA MASSACHUSETTS

WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED

Qaadashada Goboleed iyo U Qalmitaanka

Magaalooyinka Gobol/Magaalooyinka

DDS Northeast Region

Isu Duwaha U Qalmitaanka Goboleed

Xaruunta Goboleed ee Hogan

PO Box A

Hathorne, MA 01937

Lambarka Qaadashada: (978) 774-5000 x850

Lambarka Fakis: (978)739-0420

Magaalooyinka Wayn iyo Yar ee Gobolka Waqooyi Bari:

Acton, Amesbury, Andover, Arlington, Bedford, Beverly, Billerica, Boxborough, Boxford, Bradford, Burlington, Carlisle, Chelmsford, Concord, Danvers, Dracut, Dunstable, Essex, Everett, Georgetown, Gloucester, Groveland, Hamilton, Haverhill, Ipswich, Lawrence, Lexington, Lincoln, Littleton, Lowell, Lynn, Lynnfield, Malden, Manchester, Marblehead, Maynard, Medford, Melrose, Merrimac, Methuen, Middleton, Nahant, Newbury, Newburyport, North Andover, North Reading, Peabody, Reading, Rockport, Rowley, Saugus, Salem, Salisbury, Stoneham, Stow, Swampscott, Tewksbury, Topsfield, Tyngsboro, Wakefield, Wenham, West Newbury, Wilmington, Winchester, Woburn, Westford

MAAMUL-GOBOLEEDKA MASSACHUSETTS
WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED
Qaadashada Goboleed iyo U Qalmitaanka
Magaalooyinka Gobol/Magaalooyinka

DDS Southeast Region
Isu Duwaha U Qalmitaanka Goboleed
151 Campanelli Drive Suite B
Middleboro, MA 02346
Lambarka Qaadashada (508)-866-5000
Lambarka Fakis (508)-866-8859

Magaalooyinka Wayn iyo Yar ee Gobolka Koonfur Bari

Abington, Acushnet, Assonet, Attleboro, Avon, Barnstable, Berkley, Bourne, Braintree, Brewster, Bridgewater, Brockton, Carver, Chatham, Chilmark, Cohasset, Dartmouth, Dennis, Dighton, Duxbury, East Bridgewater, Eastham, Easton, Edgartown, Fairhaven, Fall River, Falmouth, Freetown, Gay Head, Gosnold, Halifax, Hanover, Hanson, Harwich, Hingham, Holbrook, Hull, Hyannis, Kingston, Lakeville, Mansfield, Marion, Marshfield, Mashpee, Mattapoisett, Middleboro, Milton, Nantucket, New Bedford, North Attleboro, Norton, Norwell, Oak Bluffs, Orleans, Pembroke, Plymouth, Plympton, Provincetown, Quincy, Randolph, Raynham, Rehoboth, Rochester, Rockland, Sandwich, Scituate, Seekonk, Somerset, Stoughton, Swansea, Taunton, Tisbury, Truro, Wareham, Wellfleet, West Bridgewater, Westport, West Tisbury, Weymouth, Whitman, Yarmouth